



## SBS waxay raadinaysaa ra'yiga bulshada si ay u qaabayso mustaqbalka idaacadda SBS iyo adeegyadeeda luqadda

Iyada oo qayb ka ah ballanqaadka SBS ee ah in la sii wado kobcinta, si loo daboolo baahiyaha Ausraliyada casriga ah, ayay SBS bilowday dib-u-eegistii joogtada ahayd ee adeegyadeeda luqadeed oo laga bixiyo idaacadda SBS. Maantana waxay fureysaa la-tashiga dad-weynaha si ay uga dhiibtaan ra'yi -celin ku saabsan shuruudaha xulashada ee qabyada ah.

Dib-u-eegista adeegyada luqadda ee SBS waa qaab-howleed shantii sannadoodba mar loo sameeyo si waafaqsan najiitada tirakoobka qaranka (national census), si loo hubiyo in adeegyada idaacadda SBS ay ka tarjumayaan baahida bulshada Australia ee sida xawliga ah isu bed-beddelaysa iyo bulshadda iyaduna is-bed-beddelaysa. Shuruudaha xulashada waxaa lala garabsan doonaa xogta kasoo bixi doonta tirakoobka 2021 si loo go'aamiyo luqadaha loo adeegayo, iyo in looga cabbir qaato sida adeegyada loo dhaqan gelin doono, shanta sannadood ee soo socota.

Dib-u-eegista adeegyada luqaddu waxay ka kooban tahay bixinta dhegaysiga idaacadda SBS iyo adeegyadeeda lagu bixiyo luqadaha kala duwan oo lagu baahiyo idaacadda, SBS On Demand, podcast-ga iyo aaladaha kale ee dhijitalka ah.

Wada-tashiga dadweynaha oo socon doona lix toddobaad oo ka bilaabmaysa maanta, dhammaanna doona 12-ka November 2021, waa fursad muhiim u ah in bulshooyinku gacan ka geystaan mustaqbalka adeegyada idaacadda SBS ee waqtiyada soo socda, iyo adeegyada guud ahaaneed ee warbaahinta SBS ku bixiso maqal ahaan iyo adeegyada ku baxa luqadaha kala du-duwanba, iyadoo isla markaana la tix-gelinayo dhammaan ra'yiyadii dadweynaha, si loo dejiyo shuruudaha ugu dambeeya ee la isticmaalayo

Agaasimaha SBS ee qaybta adeegga luqadaha, David Hua, ayaa yiri, "SBS waxay leedahay awood gaar ah oo ay ku gaari karto, kulana xiriiri karto bulshooyinka kala duwan ee Australia iyada oo adeegsanaysa adeegyadeeda luqadaha badan ee lagu baahiyo aalado badan. In ka badan 45 sannadood, ayaannu soo wadnay inaannu la jaan-qaadno habka aanu u bixinno adeegyo horumarsan oo macno u samaynaya bulshada. Maantana sidaas ayaanu in ka badan 60 luqadood, adeegyada idaacadda kaga bixinnaa, maqal ahaan, online-ka, podcast-yada iyo Apps-ka. Dib-u-eegiddani waxay caawinaysaa sida SBS hore ugu socon doonto, annaga oo higsanayna sannad-guuradayada 50aad".

\*Doorka muhiimka ah ee adeegyada luqadaha badan ee SBS wuxuu si wacan u muuqday intii safmareenka COVID-19 socdey, iyadoo luqadaha bulshooyinku door-bidaan loogu gudbiyey wargelinno lagama-maarmaan ah iyo macluumaad caafimaad. Dib-u-eegista adeegyada



Luqaddu waa fursad muhiim u ah hubinta in aannu sii wadno in addeeggayagu noqdo mid ka turjuma baahiyaha bulshooyinka Australiyada maanta.

In si joogto ah loo cusbooneysiyo adeegyadayada lagu bixiyo luqadaha kala duwani waxay SBS u sahlaysaa, inay si wanaagsan ugu adeegto bulshooyinka ugu waaweyn ee leh dhaqammo iyo luqado kala duwan, iyo sidoo kale inay adeegyo siiso bulshooyinka cusub ee baahida weyn qaba. In aannu dhagaystayaashayada cod ka siinno dib-u-eegiddani waa qodob muhiim ah, waxaanuna ku dhiirri -gelinnaynaa bulshooyinka ku baahsan Australia inay nala wadaagaan ra'yigooda.

Shuruudaha xulashada ayaa lagu wadaa in la soo gabagabeeyo May 2022-ka, iyadoo adeegyada luqadda SBS ee dib loo habeeyey la fulin doono ka hor dhammaadka 2022.

Muddada wada -tashiga dadweynaha ee shuruudaha xulashadu waxay ka bilaabmaysaa 5-ta October, dhammaanna doontaa 12-ka November 2021.